

Magaca Dugsiga:

Cinwaanka Dugsiga:

TAARIKH :

Gacaliye \_\_\_\_\_:

Iyada oo lagu saleynayo jawaabahaaga Xogururinta Luuqadda Guriga ee la dhammeystiray xilligii diiwaangelinta iyo natiijooyinka waraysiga shaqsiyeed, ilmahaaga, \_\_\_\_\_, waxaa la imtixaanay marka ay ahayd \_\_\_\_ [DATE] \_\_\_\_\_iyada oo la adeegsanayo Imtixaanka Aqoonsiga Gobolka New York ee Bartaha Luuqadda Ingiriiska (NYSITELL). Natiijooyinka ee NYSITELL waxay go'aamiyaan heerkiisa ama heerkeeda si fiican u aqoonidda Ingiriiska iyo u-qalmidda helitaanka adeegyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska (ELL) . Ilmahaaga wuxuu ka keenay heerka \_\_\_\_\_NYSITELL (eeg sharaxaadda hoos), oo xaq u siinaysa asaga ama iyada in ay ku helaan adeegyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska (ELL) ee barnaamijka Waxbarashada Luuqadaha Badan, ama Barnaamijka Ingiriiska Sidi Luuqad Cusub Ahaan.

Sax Saar <input checked="" type="checkbox"/> heerka	Heerka	haraxaadda Heerka Si Fiican u Aqoonidda Luuqadda Ingiriiska
<input type="checkbox"/>	<b>Gelitaanka (Bilow)</b>	Ardayga wuxuu aad ugu tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka darajadan.
<input type="checkbox"/>	<b>Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)</b>	Ardayga wuxuu xoogaa ku tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka darajadan.
<input type="checkbox"/>	<b>Isbeddelaya (Dhexe)</b>	Ardayga wuxuu ka muujinayaa xoogaa madax-bannaani ah horumarinta xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta, balse wali kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka darajadan.
<input type="checkbox"/>	<b>Balbalaarin (Horumarsan)</b>	Ardayga wuxuu ka muujinayaa madax-bannaani badan ee ah horumarinta xirfadihiisa ama xirfadaheeda luuqadda tacliinta wuxuuna ku dhow yahay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka tacliineed ee kala duwan ee gudaha heerka darajadan.

**Waa muhiim in aad ka soo qaybgasho HANUUNINTA WAALIDKA sidaas awgeed waxaa wax ka baran kartaa barnaamijyada Bartaha Luuqadda Ingiriiska ee kala duwan iyo adeegyada loo heli karo ilmahaaga.**

Gobolka New York, dugsiyada waxaa laga doonayaa in ay qabtaan hanuunin loogu talagalay qoysaska ardayda ELLs ee dhowaan la qoray si loogu wargeliyo waalidiinta iyo mas'uuliyiinta wixii ku saabsan barnaamijyada ELL ee kala duwan ee laga heli karo dugsiyadooda ama degmadooda. Hanuuninta, waxaad ku helaysaa macluumaad iyo qalab ku qoran afkaaga hooyo oo ku saabsan barnaamijyada ELL waxaadna awoodaysaa in aad wayddiiso su'aalo ku saabsan adeegyada ELL, adiga oo gargaar ka helayo turjumaan, haddii loo baahdo. Dhammaadka hanuuninta, waxaad buuxinaysaa Liisto-hubineedda Hanuuninta Waalidka ELL si aad u xaqiijiso in aad haysato macluumaadka loogu baahan yahay si aad u gaarto go'aanka ugu dambeeya ee khuseeya adeegyada uu ilmahaaga helayo. Macluumaadkan waxaa laguugu diyaarinayaa afkaaga hooyo.

HANUUNINTA WAALIDKA waxaa la qabanayaa \_\_\_\_ [Date] \_\_\_\_\_ saacadu marka ay tahay \_\_\_\_\_ [Time] \_\_\_\_\_ waxaana lagu qabanayaa goobtan soo socota:

[Address]

Fadlan waqti hore imaaw si aan u habsano in aan waqtigii loogu talagalay bilowno. Haddii aadan ka soo qaybgali Karin hanuunintan, fadlan wac \_\_\_\_\_ adiga oo ka wacaya \_\_\_\_\_ si aad u jadwaleysato ballan aad kaga munaaqasheyso barnaamijyada ELL ee loo heli karo ilmahaaga. Waxaanu ugu rajaynaynaa sannad dugsiiyeed guulaysta ilmahaaga dugsigeenna. Hadaad qabto wax su' aalo ah ee khuseeya barnaamijka ilmahaaga, fadlan la xiriir \_\_\_\_\_ adiga oo ka wacaya \_\_\_\_\_.

Daacadnimo,

Magaca Maamulaha:

Sax-saar halkan haddii hanuuninta ay dhaceeyso xilligii diiwaangelinta.

**SCHOOL MUST MAINTAIN COPY IN STUDENT'S CUMULATIVE RECORD**

Somali version – NYSITELL Entitlement Letter